

CARUURTA KA DHOOLLO-CADDAYSII 2010

Waalidka ama Masuulka Sharafta Mudan:

Dhakhaatiirta ilkaha ee Minnesota waxay ka welwelsanyihiin tirada kor u kacaysa ee caruurta aan fursad u haysan inay helaan daryeelka ilkaha. Sidaa awgeed khubarada ilkaha oo kor u dhaafaya 2,500 ee khabiir ayaa isu imaanaya Febraayo 5da iyo 6da, 2010 si ay caruurta danyarta ah u siiyaan daryeelka ilkaha.

Arrinkaan khaaska ee la yiraahdo "Caruurta Ka Dhoollo-caddaysii" (Give Kids a Smile) waxaa soo diyaariyey Ururka Ilakaha ee Minnesota. Daryeelka ilkaha waxaa laga bixin doonaa rugaha caafimadka ee ay jaaliyadahu isticmaalaan iyo kuwo gaar loo leeyahay ee ku fidsan Minnesota oo idil. Halkaan waxaa ku xusan akhbaar dheraad ah:

Dhammaan bukaan socodka oo idil wa in ay ballan qabsadaan ayna weheliyaan waalidka ama ilaalada uu sharciga u magacaabay. Wixii ka dambeeya Jan. 1, 2010, waalidku waxay wici karaan United Way 211 (riix 2-1-1) ama 800-543-7709. Shaqaalaha aya haysta liiska rugaha ilkaha waxay dadka ay u dirayaan meel xafaddooda u dhow. Waalidka ha wacaan xafiiska rugta ilkaha si ballan u qabsadaan

Adeegyada kala duwan ayaa waxaa ka mid ah daryeelka ka hortegista oo kamid yihiin nadiifinta, alxanka iyo daawada floorayd iyo daryeelka dib u soo celinta oo kamid yihiin ilkaha la buuxinayo. Akhbaarta ku taxluuqda adeegyada khaaska ahi ee la bixin doono Febraayo 5da iyo 6da waxaa lagu sharaxayaa marka ballanka la qabto.

Caadi ahaan, caruurta daryeelka la siinayo waa in ay da'doodu u dhaxeysaa 3 ilaa 18 sanadood. Marka la soo wacayo si ballan loo qabsado, waalidka waa in ay weydinayaan arrimaha ku taxluuqa da'da.



Aqoonta ka kororso mndental.org.

Fadlan koobi ka samayso dokumiitingan lana wadaag qoysaska aad isleedahay wa ka faa'idaysan doonaan barnaamijka "Caruurta Ka Dhoollo-caddaysii".

(SOMALI)